# GOLAHA WAKIILLADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADDA

**Kal-fadhigii 36aad fadhiyadii 13aad iyo 14aad**

**27-28/03/2018**

**Ajendaha: -** MooshinkaWax ka badalkaXeerka Lr. 23

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md.  Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Dooda wax ka bedelka iyo Kaabista Xeer Lr. 23 ee Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka.

**Gudoomiyaha: -** Waxaynu mudanayaal u balansanayn dooda Mooshinka wax ka badelka iyo Kaabis xeer no. 23, markaa xildhibaanadii doonaya inay dooda ka qayb galaan ha is qoreen.

**Guddoomiyaha:** Waxaan ku soo dhawaynayaa;

**Md. Cabdilahi Xuseen Cige: -** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka iyo Mudanayaashana waan salaamayaa. Guddoomiye waxaan doodayda ku bilaabayaa mooshinkan laga keenay xeerka ee halka qodob ku saabsan. Markaa doodaydu waxay ku salaysan tahay in aan doodan lagu koobin oo kaliya hal qodob oo laga dhigo xeerka oo dhan.

- Waxaan soo jeedinayaa in qodobo badan oo xeerkan ka mid ah wax laga badelo oo inta xeerka la soo akhriyo dabeetana doodiisa la bilaabo.
- Waxaan soo jeedinayaa anigu fikirkayga oo aan qabaa in wax laga badelo habka wax loo doorto gaar ahaan habka loo doorto Maayirka iyo Maajir ku xigeenka.
- Waxaan soo jeedinayaa qodobka 5aad oo isna ka hadlaya oo dhibaato weyn oo dalka taala ah in dalka uu leeyahay 99 degmo oo magacaaban, waxaan sharci ah 23 degmo. Dhibaatooyinka dalka haysta ee xeerkani dabrayo waa ka mid. Waxa xeerku ku waajibinayaa Wasaarada arrimaha Guddaha in Sanad gudihii qiimayn ku soo samayso degmooyinka sida xeerku dhigayo. Waxay maraysaa in sannado badan aanay wasaaradu waxba keenin. Waxaan soo jeedinayaa in Goluhu go’aan ka gaadho 76 degmo oo aan sharci ahayn.
- Xeerkankani waxa uu awood siinaya dawladaha hoose inaga oo xeer u soo saarnay wakaaladaha biyaha. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan laga saaro wakaalada biyaha.

**Md. Cali Obsiiye Diiriye: -** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Waxa Ayaan darro ah mooshinka oo laga keenay qodob ka mid ah xeerka, markaa maaha in la dhex galo xeerka oo dhan. Markaa soo

jeedimihiina ku dara oo mar kale aynu xeerka galno, laakiin imika qodobka laga hadlayaa kii mooshinka weeye. Anigu mooshinka Ayaan galayaa**.**

Guddoomiye Mooshinkaa qodobka 66aad golihii hore ayaa wax ka bedel ku sameeyey kolkii dalku khalkhalka galay. Qodobkaasi markii hore wuxuu ahaa hal dheeri (Simple Majority) kolkii dalku khal khal galay waxa la gartay in laga dhiro 2/3 (saddex meelood meelood). Markii laga dhigayna dalku wuu ka degay halkaas, baahidii qodobkaa loo qabayna ma muuqato, laakiin waxa la qaba mudanayaashii soo jeediyey in xeerka laga hadlo mar dambe. Waxaan leeyahay waxa jirta Abaaro, Sicir barar. Ayaan dalka dhibaato siyaasiya loo horseedin, waxaanan soo jeedinayaa in qodobka ka hadlaya 2/3 aan waxba laga badelin.

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi: -**Soo jeedimaha wax ka bedelka xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka. Anigoo ka duulaya mooshinka la xidhiidha wax ka bedelka Xeerka Ismaamulka iyo Gobolada iyo Degmooyinka ee inna horyaala. Si loo helo xeer anfaca dalka oo mustaqbalka qof walba xeer u noqdo, waxaan soo jeedinayaa in wax ka bedelka xeerkan laga dhigo:

**QODOBKA 18AAD EE XEERKA**

1. Caasimada Hargeysa 25 xildhibaan, laga dhigo 17 xildhibaan oo kaliya waayo, waxay culays dhaqaale ku yihiin ummadda, mana aha umadda in laga shaqaystee waa in loo shaqeeyo.
2. Degmoooyinka Darajada "A" 21 markii hore, 13 xildhibaan.
3. Degmooyinka Darajada "B" 17 markii hore, 11 xildhibaan.
4. Degmooyinka Darajada "C" 13 markii hore, 9 xildhibaan.
5. Degmooyinka Darajada "D" 9 markii hore, 7 xubnood.

**QODOBKA 2AAD**

**QODOBKA 21AAD EE WAAJIBAADKA MUDANAHA**

1. Mudanaha la doortay waxaa ku waajibay u feejignaanta iyo la socodka baahida iyo tabashada dadweynaha, xilna ka saaran yahay inuu u soo gudbiyo Golaha Deegaanka ee uu ka tirsan yahay.
2. Wacyigelinta iyo xidhiidhinta dadweynaha asaga oo ku hanuuniya kaalinta ay kaga jiraan harumarinta Deegaankooda.
3. Inuu hormood ka noqdo, horsed, abaabulo arrimaha daryeelka iyo harumarinta Bulshada sida caafimaadka, Waxbarashada, Biyaha, nadaafadda guud I.W.M
4. Inuu si daacadnimo, xilkasnimo iyo wadaniyad leh u fuliyo waajibaadka iyo xilka ka saaran xubinimada Golaha Deegaanka.
5. Xubinta Deegaanka ee aan ahayn Guddiga Fulinta waxaa ka reeban in uu farageliyo hawl maalmeedka Maamulka Dawladda Hoose iyo waaxyihiisa.
6. Dhammaan waajibaadkan, waxaa wakiilka deegaanka ku gudanayaa isagoo ka soo jeedinaya kalfadhiga Golaha, waxaana hir gelinaya oo guddiga fulinta marka la ansixiyo.

**QODOBKA 24AAD: DHAWRSANAANTA XUBINTA GOLAHA.**

3. Xubinta Golaha lama qaban karo haddii aan oggolaansho laga haysan Golaha ama aanu fal dambiyeed faraha kula jirin.
4. Xubin Gole hay'addaha baadhistu way u yeedhan karaan haddii hawl baadhiseed ka soo gasho.

Waayo, maaha mudanayaal, waa consularies, gole deegaan, ma yeelan karo xasaanad uu dalka oo dhan sharcigiisa kaga dhuunto.

Ta kale waxay noqdeen niman maalinta la doorto laga bilaabo Hantida ummadda siday doonaan ka yeela sharcigana xasaanad kaga baxsada.

**QODOBKA 66AAD: XIL KA QAADISTA DUQA IYO KU XIGEENKIISA**

**2.** Xil ka qaadista Duqa ama ku xigeenkiisa ama labadooda oo wada jir ah waxaa soo jeedin kara saddex meelood meel (1/3) xubnaha Golaha Deegaanka, iyaga oo qoraal sababaysan u soo gudbinaaya Duqa oo ku qaban doona shir aan caadi ahayn muddo (3) cisho gudahood ah oo ka bilaabanta maallinta uu soo gaadhay qoraalku waxaana nuqulo la siinayaa Guddoomiyaha Gobolka iyo Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guddaha iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka.

**3**. Haddii uu Duqu uu ku fulin waayo qabashada shirkaas aan caadiga ahayn Muddada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxaa xilkii qabashada shirkaas fulinaya Guddoomiyaha Gobolka oo muddo 5 cisho gudahood ah ku qaban doona shirka taas oo ka bilaabmaysa dhammaadka 3dii cisho ee hore. **Ma joojin karaan shirka wasiirka iyo Guddoomiyaha Gobolku haddii uu kooramku buuxsamo.**

**4.** Duqu ka baaqsaday fulinta qabashadii shirkana wuxuu mutaysanayaa ciqaab gaadhi karta waayitaanka xubinimada sida ku xusan **Qodobka 26aad** ee xeerkan.

**5.** Xil ka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa waxay ku ansaxaysaa kala badh iyo hal (Absolute Majority) tirada xubnaha Golaha.

**Md. Siciid Cartan Cismaan: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Haddaan doodaydan guddo galo xeer no. 23 ee inna horyaala qodobo ka mid ah ayaan ka taataabanaaya. Horta dalka Aafada ugu weyn ee jirtaa waa Golaha Deegaanka ee la doortay, xeerkana in dib loo eego oo xeerarka waxaynu u samaysanaa in la eego xeerku muxuu faa'iido inoo leeyahay ama muxuu khasaare inoo leeyahay. Doodayda haddaan hore ugu socdo qodob kugu horeeya ee Xildhibaan Maxamed Jaamac taabtay ee qodobka $18^{aad}$, waxaan qabaa in wax laga badelo tirooyinka Golayaashu imika ku fadhiyaan. Tiradu aad bay u badan tahay waana kuwo kharash badan Degmadii ku kharash garanaynaya oo Matalan Hargaysi waa 25 iyo kuwo 21, halkaas waxa ku baxa kharash fara badan oo degmooyinka wax u tari lahaa. Haddaba si baahida degmooyinka loo yareeyo waxaan qabaa in la yareeyo tirada Golayaasha Deegaanka Dalka, waxaana leeyahay sidan oo kale: -

- Hargeisa 15 gole deegaan ha laga dhigo
- Darajada A oo 21 ahayd waxaan soo jeedinayaa in 11 laga dhigo.

- Darajada B oo 17 ahayd waxaan soo jeedinayaa in 9 laga dhigo
- Darajada C oo 13 ahayd waxaan soo jeedinayaa in 7 laga dhigo.

Taasi waxay yaraynaysaa tirada golayaasha deegaanka ee aan macnaha lahayn ee is qab qabsiga iyo dhibaataduun kordhiya. Waxa kale oo aan qabaa qodobka xasaanada, waxaan leeyahay xasaanada saddexda Gole Qaran ayuun baa xaq u leh. Markaa magacan la leeyahay xildhibaana imika dalka uguma horaysee intaas oo gole deegaan ayeynu hore u ahaan jirnay meel gole deegaan xildhibaan ku noqday ma jirto. Magacaa waxaan la qabaa in loo daayo xubin gole deegaan oo kaliya, isla markaana qodobka 24[aad] ee dhawrsanaanta gabigiisaba meesha laga saaro waayo baahi loo qabo oo u dhawrsan xubin gole deegaan ma jirto, dastuurkana kuma jirto ee inagaa markii hore xeerka raacinay.

Qodobka kale ee isna loo socdo ee 66 [aad] ee laga qaadayo meesha oo isna markii hore ahaa 2/3 (saddex meelood meelood) in laga dhigo codka hal dheeriga ah (simple majority) sababtuna waxay tahay qodobku markii hore waxa uu ahaa hal dheeri (simple majority). Qodobka 2/3 dhibaato ayuu dalka u gaystay oo nimankii Mayiradii waxay noqdeen niman kaligood taliyayaala. Waxa uu haysanayaa dhawr xildhibaan oo ilaa afar xildhibaan oo u xidhan isaga doonayana inuu ku naas-nuujiyo cashuurta masaakiinta laga qaado. Nimanka ku doodayana waxaan leeyahay waa niman aan dalka dan ka lahayn, waar bal wadooyinkeena eega oo magaalooyinkeena eega.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin: -** Bismilaahi raxmaani Raxiim. Anigu guddoomiye hadalka badin maayo, waxaanan u badinayn waxaad moodaa in xildhibaanadii iga horeeyey dareenkayguna la mid yahay.

Waxaan taageerayaa qodobka mooshinka ee Golaha horyaala in sidii hore ee uu ahaa ay ka saartay in maayirada iyo ku xigeenkii aanay la xisaabtami Karin xubnihii golaha deegaanka ee kale oo ay u soo fadhiisan waayaan, waayo 17 marka caasimada oo 25 ah loo eego. Markaa waxay u soo fadhiisan waayeen xubnahoodii golaha deegaanka, miisaniyadii ayaa loo fadhiisan waayey. Waxaan odhan lahaa sida mooshinka ku qoran loo qaataa oo la dhigaa hal dheeri (Simple Majority).

Waxa kale oo aan ku darsanayaa in mar kastoo tirada xubnaha loo bahan yahay inay fadhiistaan ay inan yar oo badhasaab ah ama Wasiirka Wasarada Arrimaha Guduhu uu yidhaa isagoo leh ma fadhiisan kartaan oo albaabada laga xidho oo ciidamo loo diro sharciga meel allaale meel ay ka soo gashaa ma jirto. Markaa gole ayaa markuu cusubaa si caadifiyadaysan u badalee sidisii hore ha lagu celiyo oo haddii xubno ay helaan majority aanay u joojin mid wasiir iyo badhasaaba.

Mid kalena waan ku dari lahaa oo aanay taaban xildhibaanadii iga horeeyey oo ahaa xeerarka cashuuraha ee dawladaha hoose waxa loo raaci jiray xeer no. 12. Waxaynu xeerkan ku ansixinay inay cashuuraha sameeyaan, bil kasta way kordhiyaan cashuuraha oo dadkaa masaakiinta ah ee sicir bararku hayo ayaa maalin kasta lagu kordhiyaan oo wax loo dulqaadan karo maaha imika waxay kordhiyeen seddex laab. Waxaan odhan lahaa cashuuraha ha laga saaro xeer no. 23 oo dib ha loogu celiyo xeerka midaynta cashuuraha xeer no. 12. Yeynaan qodobka degmooyinka u

gudbin, laakiin qodobada ay soo jeediyeen Xildhibaan Maxamed Jaamaca iyo Xildhibaan Siciid Cartan intaba waan ku raacsanahay.

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Martida waan salaamayaa marka hore, salaan ka bacdi, Xeerkan ama Mooshinkan aynu hada ka hadlayno sida sharci-yaqaankiiba sheegay Xeerku wuu furan yahay mar hadii qodoba la furay, waxyaabo badan oo in la taabto u baahanina way jiraan waayo iminka Degmooyin baa wax allaale waxay xuquuq leeyihiin aanay jirin oo lix Degmo ayaa lagu soo ururiyaa wax walba, Dastuurkuna ma jidayn in dalka kala qoqobnaado oo degmooyinka la ilaawo degmooyina ay noolaadaan oo la kobciyo, markaa dadku inay wada noollaaddaan waa muhiim.

Qodobadda Degmooyinkaas in laga hadlo oo meesha lagu soo daro weeye, waayo Xeerkani wuxuu sheegayaa in Degmooyinka cusub la qiimeeyo oo tii u qalantana la ansixiyo, ta aan u qalmina laga noqdo kalsoonida, markaa hadii aan lagu soo darin hadda waxay noqonaysaa inaanu Mooshin kale keeno, laakiin mar hadii xeerkii la furay oo mooshin hada laga keenay aynu qodobadaas wadda eegno oo wixii bulshadu inta badan taabanayso aynu qiimeyno oo degmooyinku wax walba way leeyihiine qaar magac u yaal ah iyo qaar u qalma xuquuqdooda inay kala siino waa waajib.

Arrinta Qodobkan Mooshinka laga keenay hadaan u soo noqdo, qodobkan hada ka horba waa la keenay dood badana waa laga galay hadana waa la soo celiyay, sababta loo soo celiyay waxay ahayd dalkoo dhan baa mar wadagaly crisis oo wadda fadhistay, Markaa anigu waxaan qabaa Maanta mar haddii doorashadoodii siddeed bilood ka hadhsan tahay sabab sidaa loogu gala ma jirto oo dadkiiba way iska dhibaataysan yihiin oo waxyaabo badan baa taagane in dhib kale loogu dara ma fiicna, sidoo kale shalay waxaynu ogayn in Madaxweynuhu Mashruuc cusub u furay, markaa hadii qolo cusub la keeno mashruucii wuu burburayaa, waxaanan soo jeedinayaa inay shaqadoodii sii wataan, Xeerkana in wax lagu darro oo la wada naaqisho waa muhiim, intaasaan ku soo ururinayaa, wa bilaahi tawfiiq, WSC.

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir: -** Shir-gudoonka, Xidlhibaanada iyo Saxaafada waxaan ku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, ilaahay kheyrka ha inna waafajiyo oo sida dalka u khayra alle ha inagu haggo.

Waxaan u malaynaa Xeer Lr. 23 oo aynu wax ka bedel ku samaynay sanado badan Qodobka 66aad Farqadiisa 5aad na Goluhu Mooshinka keenay kamay iman cid kale ee inaguun bay inaga timi dadka maanta loo shaqaynayaana nin dhaliila iyo nin aan dhaliilinba inaguun baa Gole ahaan keenay isagoo markii horeba ahaa simple majority lagana dhigay 2/3, marka iminka waxaa muuqata in la leeyahay wixii barigaa looga dhigay baa maanta meesha ka baxay, anigu ma doonayo inaan wax kale ku war-wareego waxaan doonayaa in wixii laga soo jeediyay mooshinka oo ay sharci tahay dooduna inay ku eekaato, maaha in loo talaabo qodob kale, maaha inaynu furno albaabo kale, nimankii Mooshinka soo jeediyay ee sharciga inuu waafaqsan yahay loo eegay wuxuu ku eegyahay Qodobka 66aad Farqadiisa 5aad oo kaliya.

Hadaba anigoo taas ka duulaya Waxaan ku salaynayaa doodayda Qodobada **Dastuuka ee 110aad, 111aad Farqadihiisa 8aad, 9aad iyo 10aad iyo Qodobka 12 farqadiisa 1aad ee isna Dastuurka**, sidoo kale **Xeerkan Lr. 23 Qodobkiisa 37aad** oo wadaajinaya isla markaana cadayna Golayaasha Deegaanku waxay ka mid yihiin fulinta oo ah hay'adda Xukuumada lanna siman Golayaasha Xeer-dejinta, mid waliba shaqo leedahay labada hay'addood, marka la ilaalinayo dawladaha hoose shaqadoodda iyo dabagalkeeda waxaa xaq u leh Wasaarada Arrimaha Gudaha sida ku cad qodobadda aan soo sheegay, hadii dhaliili ka timaado oo ay inoo muuqato inagu xaq baynu u leenahay in wixii umada dan u ah ka matalno. Gole ahaan wax allaale wixii ka khuseeya Xeerka ina horyaal ee Qodobka laga soo jeediyay xaq baynu u leenahay.

Sidaa darteed, anigu waxaan leeyahay dhaliisha loo wayay Wasaarada Arrimaha Gudaha oo ay hoos yimaadaan Golayaasha Deegaanka maaha inaynu si khaasa ugu qabsano inagu, waxaan aaminsanahay in marka mooshin la soo jeedinayona loo baahan yahay in qodobka laga keenayo mooshinka waxyeeladiisa iyo sababta loo badalayo la sheega, sidoo kale waxtarka laga doonayo la sheegaa, hadii kale kal-gacal baa ku jira iyo nacayb oo ah in cid la jecelyahay ama cid la necebyahay, marka xeer la samaynayana ma fiicna inay sidaas u muuqato, waxaana fiican in markaynu wax badalayno ama aynu wax abuurayno waa inaynu ka leenahay ujeeddo ah in wax lagu hagaajiyo oo horumar lagu gaadhayo.

Marka Gudoomiye adigana waxa ku saaran inaad nagu ilaaliso wixii mooshinka laga keenay oo aanu xildhibaan walba siduu doonayo aanu u hadlin, anigu waan aaminsahay in Xeer Lr. 23 in wax laga badalo oo 28 Qodob oo ah ka mid ay u baahan yihiin in wax laga badalo si dhismaha wadanka iyo horumarkiisu u hagaago, fulintuna waxay inoo qaabilsan tahay dhismaha wadanka iyo horumarkiisa, hadii dawladihii hoose ay ka mid noqdeena hay'addii fulintii horumarkii caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo laydhka iyagaa ka masuul ah, wixii lagu dhaliilayona waxay la qabaan hay'adda fulinta, markaa waxaan soo jeedinayaa Xeerkan hadii aanan wax laga wada badalayn xiligeeda ay ku haboon tahay aynu la sugno oo yaynaan waxba qodob u kala qaad-qaadin, waan ka baxay, WSC.

**Md. C/casiis Ismaaciil Ducaale: -** Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Sharafta mudan waxaa muuqata anigoon aad ugu fogaanayn waxa Madaxweynaha loo doortay Shanta sanadood waxa weeye shaqo qaran baa la qabanayaa hadii la yidhaahdo bil baynu shaqaynaan, waynu soo aragnay dhibaatadani waxay ku timi ee maanta looga hadlayo.

**Anigu waxaan qabaa: -**

- Markaa iminka hadaynu inaguna bilawno crisis runtii dhaliilo way jiraan, sidee dhaliilada jira wax looga qabanayaa oo Maayarada iyo nimankan fulinta dawladaha hoose sidee bay accountable ugu noqnayaan Golaha Deegaanka, markaa hadii aynu doonayno inaynu taabano wax jira oo aynu nidhaahno waaxaa laga dhigayaa simple majority bil walba waxaa la doorayaa maayar cusub, waddanka aynu ognahay xaaladda uu ku jiro maanta ma awooddayaa in la yidhaado bil walba maayar baa la dooranayaa.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal: -** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafad waan idin salaamayaa ASC, Gudoomiye Mooshinkan la keenay waxbaan ka saxeexay, aan saxeexe sababtaan u saxeexay waxay ahayd islaax iyo wax badal ha la sameeyo, waxaan ka yaabanahay waxa u badalay aynu ka takhalusno, waxaan la sheekaystay xubno Golayaasha Deegaanka ka mid ah, waxaan waydiiyay yaa damacsan tihiin? Waxay iigu jawaabeen kani uun hana dhaafo, kan joogaa ha na dhaafo, ujeedaddaydu waxa weeye sheeko yar oo xikmad leh baan idiinka sheekaysanayaa in yar ii dulqaata, Madaxweyne Cigaal AHN markii uu sameeyay Xisbiyada waxaa lagu yidhi Golayaasha Deegaankana raaci, wuxuu ku jawaabay, nin iminka aan u arko kan ugu wanaagsan oo Hargaysa wax ka qabtay waa Maayar Cawl wuu xanuunsanayaaye faataxada aynu marnee, wuxuu yidhi maalin walba waxaa ii yimaada 25 ashkato oo Cawl ka askhatoonaya, marka in 25kaa idiin yimaadaan baydnu garan, maanta 25kii cawl way joogaan, maxaa waxan ina galiyay.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- Sagaalkaa billood ee inoo hadhay, isbadal baa dhacay oo Madaxweyne Cusub baa la doortay oo shalay waynu ogayn Dawlada hoose ayuu joogay mid walibna sidaasu u khadh-khad leeyahaye, markaa war arrintu sidaas ay iminka tahay ha ahaato, hadhow markay doorashadu timaado cidii la doonayo ha la doortee, WSC.

**Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe):-**Mudane Gudoomiye waad mahadsan tahay jaaniska aad isiisay, runtii arrimaha Golayaasha Deegaanku waxaad moodaa intan inay aad uga qoto dheeryihiin, waxay gacanta ku hayaan arrimo xassaasi ah oo nolasha dadkii ina soo doortay taabanaysa sida nadaafada, cashuurta, biyaha iyo dhulkii, xeerkan aynu samaynayna hawlo uga muhiimsan bay umada u hayaan. Haddii aynu doonayno inaynu Gole ahaan inaynu ka hadalno waxay ila tahay aniga arrinkaasi wuxuu u baahan yahay sidan si ka qoto dheer inaynu u eegno.

Golayaasha Deegaanka markii la sameeyay waxay soo kordhiyeen dhibaato badan iyo dayacnaan, anigu waxaan qabaa in Xeerka laga eego meelo badan sida tiradoodda tusaale ahaan Hargeysa oo 25 xubnood ah in la yareeyo, in sidoo kale shuruudaha lagu soo xulayo wax laga badalo, siday u shaqeeyaan lafteeda in la eego, Marka Xeerkaasi indib loo wada eego oo la hagaajiyo ayuu u baahan yahay oo aynu arrinta Gudi u saarno ka soo shaqaysa.

**Waxaan soo jeedinayaa markaa: -**

- In Gudi loo saaro (Ad hoc Committee), in taradaas wax laga badalo waan jeclahay, hadana dooni maayo inay wax fadhiisan waayaan oo markasta la doorto mid cusub, sidaa darteed, Gudoomiye Gudi ha loo saaro oo aynu xirsiga u qabano, waan ka baxay.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil: -** Gudoomiyaha, Xildhibaanada iyo saxaafada intaba waan idin salaamayaa marka hore, anigu Mooshinka Qodobka 66aad laga keenay waxaan qabaa in go'aan laga gaadho, isla markaana inay mihiim tahay in Xeerka oo dhan u baahan yahay in wax laga badalo halkii qodobkan kaliya wax laga badali lahaa, Xeerkan waxa in lala akhriyo u baahan xeerar

badan sida Xeerkii Maaraynta Qashinka, Xeerka Biyaha iyo Xeerkii Midaynta Cashuuraha Xeer Lr. 12kii.

Markaa Waxaan soo jeedinayaa in sidaa nimankii iga horeeyay sheegeen qodobkaas 66aad oo kaliya aynu badalnaa aanay micno badan samaynayn, hadii wax lagu darayo aynu ku darno Xoghayaha Dawlada hoose Qodobkaas 45aad oo meesha laga saaro Xoghayahan loo soo magacaabayo oo aynu ka dhigno in Dawdalaha hoose iyagu soo magacaabaan Xoghayaha isla markaana iyagu eryi karaan iyadoo loo samaynayo shuruuc, hadii kale waxaa iman doonta in wali arrinta centralization inaga xidhnaato.

**Markaa Waxaan soo jeedinayaa: -**

- In hadii wax lagu darayo in Qodobkaas 45aad aynu badalno oo intaynu shuruudo iyo qodobo raacino ka dhigno in iyagu magacawdaan xilkana ka qaadi karaan xoghayaha Dawlada hoose si meesha ay ugu baxdo centralization kaa Wasaarada Arrimaha Guduhu meesha ku haysato, isla markaana Xeerka oo dhan lagu sameeyo dib u eegis iyo kaabis.

**Gudoomiyaha: -**Xildhibaanada waxaan ogaysiinayaa in barito arbacada dooddu sii socon dooonto waayo xildhibaano badan baa is qoraye sidaas ha ula socdaan, waxaana ku soo dhawaynayaa Md. C/kariim Aw Cali Shabeel.

**Md. C/kariim Aw Cali Shabeel: -** Mudane Gudoomiye Mudanayaal Salaan ka dib, somalidu waxay ku maah-maahdaa labadii tallaaboba tallaa ka dhex dhalata, waxaynu ognahay oo aynu ka warqabnaa in muddo dheer haday tahay xildhibaanada tahay iyo haday tahay dadweynaha guuxa iyo dareenka ka baxay oo Xeerkan Lr. 23 inay wax badan ka khaldameen barigii qalooc badanina uu galay, waxa kale oo wayo aragnimo farabadan laga dhaxlay dhibaatoyinkii doorashooyinka Golayaasha Deegaanka ka dhalatay oo aad iyo aad shacbiga iyo xildhibaanada Golaha Wakiiladuba aad loo saluugay, iyadoo mooshinka la soo qoray ayna xildhibaanadu durin ay majooritigoodii oo loo baahan yahay in lagu koobin qodobka la keenaye wakhti badana aanan lagu lumine Xeerka Qodobadaas xildhibaanadu ka hadleen ee farabadan ee ta xasaanadu ku jirto ama ay ku jiraan tirada iyo degmooyinka siday kala yihiin ama khaladaadka kale ee Xeerka ku jira.

Markaa waa in Shir-gudooonku tixgaliyo doodan halkan ka furan dhinacay u badato, Mudane Gudoomiye tixgalisaan, isla markaana yaynaan ku eekaan qodobka Mooshinka kaliye qodobadaas Xildhibaanadu ka hadleen loo saaro Gudi oo qodobadii la saluugay wax laga soo badalo oo la soo habeeyo lana de-dejiyo, laakiin si laab lakac ah mooshin la iska soo qortay aynaan wakhtiga iskaga lumin.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- Sida dooda XIldhibaanadu u badan tahay aynu raacno, isla markaana waxaynu ka wakiil nahay guuxa iyo dareenka dadkii inna soo doortay qabaan markaa go’aankeena aynu ku salayno.

**Md. Maxamed Cali Xirsi: -** Acuudu bilaahi bismilaahi Raxmaani Raxiim, gudoomiye waad mahadsantahay, ugu horayn waxaan halkan uga mahad naqayaa xildhibaanada mooshinkan keenay iyo gudoomiyaha oo mooshinkan dariiqii saxda ahaa ka qaatay, ugu horayn mudane gudoomiye waxa uu mooshinkani yahay hal qodob ugu danbayntana waxay noqonaysaa in aan qodobkaa oo kaliya u foodno, waana sida saxda ah ee uu mooshinkani yahay, dhinacyada kala jaadka ah ee aan ku daraynaa waa goonideeda.

Mudane gudoomiye, waxa jiray mooshinkan mooshin ka balaadhan oo golaha aan keenay 2015 goluhuna diiday, halka isaga oo qodob kali ah aan maanta soo celinay kuna saabsan in maayarada iyo ku xigeenadooda dib loo eego ma absolute majority mise simple majority oo aan doonayno in aan hoos u dhigno.

Xidhibaanada waxay u badan yihiin oo ay ka hadlayaan waa xeerka dib ha loo eego, taas oo ana aan la qabo xildhibaanadii iga horeeyay oo dhan, sidoo kale qodobada in dib loo eego u baahan waxaa ka mid ah **Qodobka 3**$^{AAD}$ee xeerka ina hor yaala oo ah shuruudaha lagu maamulayo gobolada iyo degmooyin iyo **Qodobka 14**$^{AAD}$oo ah dhawrsanaanta xildhibaanada, sidoo kale waxaa iyaduna mudan in dib loo eego xilka ay u hayaan gobolada iyo degmooyinka.

Waxaa kale oo iyadana u baahan in aan dib u eegno tirade mudanayaasha golaha deegaanka oo aan isla qaadanay in ay aad u baladhanyihiin, waxaa kale oo mudan in la eego xilka golaha deegaanka, sidoo kale **Qodobka 38**$^{AAD}$ ee ah xilka fulinta.

**Qodobka 40AAD** oo ah awoodaha duqa iyo ku xigeenkiisa oo dib loo eego
**Qodobka 45AAD** oo ah xoghaya fulinta oo isna ah caqabadaha ugu waaweyn ee goleyaasha deegaanka haysta ee aan had iyo jeer aragno, muskiladi ma dhacdo iyada oo ka bilaabanta Maayarka iyo xog-hayaha mooyaane.

**Qodobka 46AAd** ayaa isna u baahan in dib loo eego oo ah mushaharka iyo gunooyinka xildhibaadu ay ku dhufteen afka.
**Qodobka 47AAd** kulamadooda, waxa jirta oo u qoran hadii intaas oo kulan ay samayn waayaan in la kala diro ayaa u qoran, waxaanan ognahay intaas oo degmooyin ama gole degaano in aanay sadexdaa bilood ee la sheegay in aanay fadhiisan ama ay dhaafeenba, hase ahaatee waxaa Meesha ka maqan fulintii lagu fulin lahaa in la kala diraba.

Waxaa u baahan oo iyaduna muhiim ah qodobka **19AAD** ee wasaarada Arimaha guduhu ay ku leedahay goleyaasha deegaanka, qaran ahaan, baarlamaan ahaan waxaa inooga masuul ah wasaarada arimaha gudaha taas oo iyada lafteeda uu mad-madaw fara badani ku jiro, in wada shaqaynta iyo siday u maamulayso dib loo eego. Waxaa kale oo isna u baahan habayn iyo ku noqosho Qodobka **60AAD** oo ah qaab dhismeedka golayaasha deegaanka.

**Qodobka 67AAD** oo ah maamulka dawlada hoose siday dhexdooda isku maamulaan, gudiyadooda iskaga maamulaaan, oo ay maayiradooda u maamulaan, oo ay fadhiyadooda u maamulaan ayaa isna u baahan in si balaadhan dib u eegis lagu sameeyo. Qodobka 68AAD ee ka hadlaya habka loo maamuli maaliyada ayaa iyadana u baahan in dib loo eego oo aan wax kaga qorno xeerkan.

**Qodobka 70AAD** ee dhismaha mashaariicda ayaa isna u baahan in dib loo eego, mashaariicdu waa meelaha ugu muhiimsan, waxanan hada ognahay in dawladaha hoose ay bixiyaan laakiin sharciyan, diiniyan iyo dadnimo midna maahan, waana meelaha laga naas nuujiyo oo in dadka bid loo sameeyo ay tahay, hada wadooyin ayay sameeyaan, waxyaabo badan ayay iibsadaan oo waad aragteen, waana in xeerka lagu adkeeyaa in aanay iyagu aanay waxba iibsan waxbana aanay qaban oo inta ay bid galiyaan shacabku qabto.

Miisaaniyadooda oo ah qodobka 78AAD oo Iyana dib loo eego ayaa aad u muhiim ah. Qandarasyada oo ah Qodobka 99AAD iyo awooda ay dawlada dhexe ku leedahay intaas oo qodoba gudoomiye waxay u baahanyihiin in dib loo eego, si kale hadii aan u dhigo xeerka gabigiisuba waa xeer kooban oo dayacaad farabadin ka muuqato una baahan in si xirfadaysan oo aqoon leh loo eego dib u eegisna lagu sameeyo.

Waxyaabaha aan soo galin karno waxaa ka mid ah dimuquraadiyada oo la daadajiyo, had iyo jeer waxaan aragnaa in gobolka maroodi jeex laga soo doorto 25xildhibaan gobolka oo dhan waxaanan qabaa in aanay daadajisnayn dimuquraadiyadaasi. Waana waxyaaba aan ku cusboonaysiin karno in xaafado laga soo doorto, oo xaafadahaasi ay xildhibaanadaa ay masuul ka noqdaan oo maamul daadajin hoose ay ka dhacdo.

Sidoo kale waxaynu ku fikiri karnaa habka loo doorto xog-hayaha, habka ay wasaaradu u keento xog-hayaha. Sidana ku shaqayn mayso xog-haye dusha laga keenay oo inan yar ragii la soo doortay la soo dhex dhigay oo maamulkii loo dhiibay, oo 3milyan iyo 4milyan oo dollar loo dhiibay in uu saxeexo, waana halka ugu horaysa ee ay dhibaatadu ka dhacdo ee ay maayarada iska qabsadaan, taas lafteedana waxaan u baahanahay in aan dib u eegno.

Maayarka ma dooran karnaa doorashada soo socota? Sidoo kale da'dan aan hoos u dhignay, waxaas oo dhan gudoomiye waxaan qabaa in dib loo eego, waayo inaga ayaa golaha tayayn karna waxaan ku tayayn karnaana waa xeer ee maaha hebel iyo hebel.

Waxaan soo jeedinayaa mudane gudoomiye qodob kaliya oo aynu qabanaa oo aynu badelnaa in aanay micno badan samaynayn, anoo eegaaya waxaa badan ee ay xildhibaana badan koodu ku hadleen anoo eegaya waxaas oo qodobo ah, qarankana ay dawlada cusubi timid, Somalia oo aan is hayno, ilama haboona in aan gobolada iyo maayarada is qabsano, waayo goluhu wuu diiday in laba sano horteed wax ka badalno oo faa'iido lahaan lahayd xataa hadii maayarada la badalo, in maayarka oo ay sideed bilood u hadhay aan badelno micno weyn inooma samaynayso, markaa waxaan soo jeedinayaa oo aan farta u taagayaa in aan mooshinka hakino.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- In gudi culus oo xeerkaa daadajisa oo wiiga danbe haduu doono illaa qodobkaasi ha ku jiree in xeerka aan ugalno waanad mahadsantihiin.

**Md. Cabdiqaadir Asker Xassan: -**bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudane gudoomiye iyo mudanayaasha sharafta leh. Qodobadayda waxaan ku soo koobayaa 3qodob.

Mabda'iyan waan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay in aan lagu koobnaan qodobka mooshinka laga soo jeediyay ee xeerka la balaadhiyo waan laqabaa mudanayaashii iga horeeyay.

Waxaan soo jeedin lahaa labada awoodeed ee golaha deegaanka ee uu maayirku ku xukumaa waa dhinaca maaliyada iyo dhinaca foodka ridista, qodobada khuseeya labadaa arimood, oo ah qodob ka mooshinka laga soo gudbiyay dabcan, anigu waxaan ku soo kordhinlahaa qodobka maaliyada in si gaar ah loo eego xeerka, waana in maaliyad iyo maamulkeedu ka madaxbanaanaadaan maayirka maadaama oo uu yahay gole la soo doortay oo isaguna doortay maayir iyo ku xigeen, waana in uu ula siman yahay xubnaha kale.

Si kale hadii aan u dhigo waa in nidaamka xisaabaad ku uu maraa nidaamka dawliga ah ee dawlada dhexe oo kale, waanu in uu maraa sida xisaabiyaha guud, hanti dhawraha guud iyo xisaabiyaha dawlada hoose iyo xisaabaadka baanka waa in uu nidaamkaa maraa ee aanu noqon jeeg. Khasnad iyo lacag dhextaala xafiisyada dawladaha hoose ama goleyaasha deegaanka.

Mararka qaar waxaa dhacda sidii fadeexadii ka dhacda Hargeisa oo kale in uu baakidhka uu sigaarka uu ku cabayo uu lacag ku qoro hebel intaa siiya hebelna intaa u geeya, oo rasiidhadii haday ay noqdeen waxyaabo noocaas ah, markaa maamulka dawladaha hoose sida uu udhan yahay wuu khaaribanyahay. Marka laga soo bilaabo miisaaniyada ay sameeyaan oo aanay u marrin nidaam, waxaanay marayaan nidaam aad odhanayso runti tukaan ama maqaaxi la maamulayo.

Xog-hayaha ayaa soo dajiya miisaaniyad maayarka ku xigeenka iyo gudidda fulinta ayaa ansixiya xubnaha golaha deegaanka ee kale waxba kama oga lamana ansixiyo miisaniyadaa oo ma soo marto mana soo gaadhin miisaaniyad sax ahi Wasaarada Arimaha Gudaha, Golahan Wakiiladana ma soo gaadho. Hadii aad weydiiso xubnaha golayaasha deegaanka waxay ku odhanayaan waxba kama jiraan ee waa been waxan la soo gudbiyay.Waxaanad moodaa in nidaamka maaliyadeed ee dawladaha uu dhamaantii qaldan yahay waana waxa keenaya inta badan isku dhacayo iyo maamulka oo khalkhala mana waafaqsana nidaamka maaliyadeed ee dawlada dhexe, markaa waan aaminsanahay in xeerka dib loogu noqdo.

**Md. Ibraahim Caraale Cabdi (rush):-** shirgudoonka iyo xubnaha golahaba waan idin salaamayaa salaamu calaykum waraxmatulaah, waxaan laqabaa xildhibaanadii iga horeeyay ee uu ka midka ahaa xildhibaan Maxamed Jaamac, sidoo kale waxaan laqabaa in mooshinkani uu markii hore ahaa hal qodon ayna xildhibaanadu soo jeediyeen iyaga oo xaq u leh in xeerka oo dhan wixii laga bedeli karo laga badalo laguna sameeyo kaabis iyo wax ka bedel.

Mudane gudoomiye adiga oo xaq u leh hadii aad qodobkaa oo kaliya aad nagu ilaalinaysid dee qodobkaa ayuunbaanu ka doodi lahayn, lakiin mudanayaasha soo jeedintooda umaad codayn ee waad fasaxday dee markaa waxay noqonaysaa in doodaa mudanayaashu aanay noqon mid la iska tuuro ee ay tahay dood sharci ah xeerkii dhamina wuu furan yahay oo wixii halkaa laga dooday ay noqdaan wax lagu soo celiyo oo aan loo codayn, waayo hadii ay qodobka kaliya tahay dee maba daaleene qodobka ayuun baanu u codayn lahayn wanan ku kala bixi lahayn.

Gudoomiye mudanayaashu xaq ayay u leeyihiin in soo jeedintooda la tixgaliyo, iyaga oo badan waxay soo jeediyeen in xeerku furan yahay waxna laga bedeli karo qodobadiisa, sidaa ayay doodu ku socotay adna aad ku dhagaysatay oo qodob kaliy aanad nagu ilaalin doodaasi waa in ay noqotaa dood lagu soo celiyo oo aan u gacantaagno qodobkaasi waa iga hafeef.

Qodobka labaad marka ugu horaysa Golaha Deegaanka ee 25 xubnood marka la yidhi 2/3 ayaa gudoomiyihii iyo ku xigeenkii ay doorteen lagu ridi karaa waxaan anigu odhan karaa waa musta xiil waana waxaan suuro gali karayn taasna umad laguma maamuli karo, anigu waxaan adkaynayaa hadii absolute majority ama 13xubnood laga dhigo gola caasimada oo kale golaha 21ka ah laga dhigo 11xubnood anigu waxaan filayaa in aanay ahayn in suurada laga xumeeyee ee waa tiro macquul ah oo ninkaa la doortay uu ilaaliyo xubnihii soo doortay daryeelkooda iyaguna ay accountable u noqdaan hagina karaan maamulina karaan, hadii kale waxaa lagu xidhay dabar aanay maamuli karin sixina karayn ayay noqonaysaa.'

Waxaan soo jeedinayaa oo aan adkaynayaa in lagu celiyo awalba inaga ayaa ka badelnay ee in hal dheeri lagu celiyo (absolute majority). Waxaana ka dhashay badelkii aan badelnay xubno la soo doortay oo la canaanayo oo la leeyahay shaqayn maysaan oo maamulkoodii ayna waxba ka badali karrin ilayn iyagaa doortee.

Anigu waxaan leeyahay yaynaan u kal uuto-uutaynin maayiradu ceebna maha waayo waxaynu nahay xildhibaano la soo doortay, awal inagaa badelnay maantana xaq ayaynu u leenahay in aan badelno hana lagu celiyo halkii hore ee ahyd hal-dheerida.

Qodobka labadaad madaamo oo xeerkii oo dhan la gudo galay gudoomiyuhuna uu fasaxay oo ay xildhibaanada oo dhami ay soo jeedinayeen waxaan taabanaya qodobo dhawr ah: -

- Waxaan la qabaa in doorashada soo socota la dhimo tirade golayaasha deegaanka ee la soo doorto oo ah tiro aan dalku qaadi karayn waxanan la qabaa xildhibaan Siciid cartan in caasimada laga dhigo 17xubnood caasimadaha kale grade A-ga ahna la dhigo 13xubnood kuwa B-da ahaan jiray ee 17-ka aan jirayna laga dhigo 9xubnood iyo kuwa ugu hooseeya oo ah 7xubnood soo jeedintaan waan ayidayaa.

- Waxaa kale oo aan taabanayaa qodobka 24AAD ee xeerka lr. 23 ee tirade ka hadlaya wuxuu qorayaa 25xildhibaan 21xildhibaan 27xildhibaan anigu magacaa xildhibaan waan ka badelilahaa sida ragii horaba soo jeediyay iyaga oo xubin gole deegaan ah in halka ay ku qoran tahay xildhibaan aan ku qori lahaa ADEEGE, waayo khalad badan ayaa ka yimiday oo

waxaa la isku khaldaa xildhibaanada Baarlamaanka iyo ku deegaanka weyna isku curduduuban yihiin markaa waa in aan kala saarnaana xoq ayaynu u leenahay.

Anigu waxaan leeyahay waa in magacaaga dhamaantiiba laga badalalaa oo aan xildhibaan loogu yeedhin.

Qodobka kale ee ka hadlaya xasaanada wuxu u baahanyahay dib u eegis, wuxuu u baahanyahay xildhibaanka heer qaran iyo xildhibaankii deegaanka ee degmo yar laga soo doortay hadii ay isku xasaanad noqdaan dee maaha suuro gal ee waxaan leeyahay hadii la samaynayo xasaanad halagu soo reebo maayirka iyo ku xigeenka ay dooranayaan in ay xasaanad leeyihiin, laakiin xubnaha kale oo dhami malaha xasaanad sharci ah oo aynu halkan ka siino oo lamid ah ta golayaasha baarlamaanka taas halkaa ayaan dhigi lahaa.

Qodob kale oo ay xildhibanada qaar ka dhawaajiyeen marka ay xubnaha golaha deegaanku doortaan fulintooda oo ay kaw ka yihiin gudoomiyaha iyo kuxigeenku waxaan qodob ka dhigu lahaa "*xubinta golaha deegaanku ma faro galin karto hawl maalmeedka ay gudida fulintu u xilsaarantahay"* oo hadii xubintii aan fulinta ahayni daba gasho xubintii u igmatay fulintu in hawl qabato oo ay dabarto iyadna looma baahna taana waan adkayn lahaa.

Gabogabadii gudoomiye doodu waxay u bilaabantay inaga oo buuqayna nin walawba hadalkaaga sumad ku dhigo anaguna soo jeedintayadii waanu cadaynay, xildhibaanaduna doodoodii wey cadeeyeen, mana aha mid la iska tuuri karo oo qodobaa mooshinka ku qornaa maaha, markii horana waan ka afeeftay hadana waan ku celinayaa waa in doodaa xildhibaanada in lagu soo celiyaa golaha loona codeeyo iyada oo qodob qodob ah, wa bilaahi towlfiiq.

**Md. Wali Axmed Xaawo: -**bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo golahaba aad ayaan u salaamayaa, waxaan ibraahin caraale la qabaa in afar nin oo muraad lihi golaha qaylo ku tuurin, waxaanan wakiil kanahay dadkii ina soo doortay magaalo iyo miyiba, waxay nimankaasi maamulaana xog-balaadhan ayaynu dhamaanteen u nahay waxanan maalin walba soo dhaafnaa intaas oo fayl oo qof qudhaata ahi leeyahay, waxa nabad galyo xumo dalka ka dhacaana waa arin maayir dhigay oo dhul ayay ku saabsan tahay maxkamada hadii aad tagto.

Markaa waxaan Ibrahim ku raacsanahay in mooshinkaa iyo arintaasi ay halkaa taalo, maanta afartii oday ee mooshinka nala sexeexay waa kaa wali faqa wada. Waxay ila tahay aniga in arintaa xal laga gaadho mooshinka. Dhibaatooyinka jira hora loo yidhi hadal badanina waxba ma taro ee waa in tirada iyo qodobadaa la dhaafo, dhan kale in xildhibaanadii la doortay aanay waxba gacanta ugu jirin sadexdaa nin mooyaane, danbigaana inaga ayaa dhignay ayaa Meesha taala, waaxanan leeyahay oodii qodaxda lahayd ee aan dhignay yaan la qaadin raga lihi ayaanay ina hogaaminin.

Waxaana ay samaysteen xafiisyo kale oo faylasha loogu geeyo oo xafiisyadaba ma yimaadaan, markaa gudoomiye mooshinkii aan keenay iyo doodiiba waanu kaaga fadhinaa in aad keento wanan ka baxay.

**Marwo. Baar Siciid Faarax: -**Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Golaha, Saxaafada iyo Cid kasta oo joogta waan salaamayaa Asaalmu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu. Bacda salaam,

aniga rayigayga waxay ila tahay doorashadii waxa ka hadhsan wakhti gaaban oo sannad ka yar. Xeerka haddii aan la wada badelayn waxay ila tahay inay fadqalalo ku keenayso dad dhawr bilood jooga. Waxa kale oo ii muuqda dadbaa soo jeediyey tirade in la yareeyo, xubnaha tiradooda haddii la yareeyo waxay noqonayaa cid aan tiradii badnayn aanay soo bixin, sababtu waxa weeye 15000 cid ka yari ma soo baxayso, taasina waxay caqabad ku tahay dadkii meesha ka maqnaa ama dadka la hayb sooco ha noqdaan, dumarka ha noqdaan ama dadka tirada yar ha noqdaan.

Waxa kale oo aan is leeyahay haddii xeerka dib loogu noqdo waxa uu dib u dhigayaa doorashada, hadhawna waxa la odhanaya doorashadii dib ayey u dhacday oo cid ayaa dib u riday. Maadaama doorasho loo diyaar garoobayo wakhti yari inoo hadhsan yahay, maadaama doorashada kuwa galayaa golaha deegaanku ka mid yihiin.

Anigu waxaan soo jeedinayaa xeerka sidiisaa ha loo daayo ilaa kuwa dambe, haddii aan loogu talo galayn cida ka dambaysa.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Maxamed Yuusuf Waabeeye: -**Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waad mahadsan tahay Guddoomiye. Qodobkan 66aad xeerka ismaamula Gobolada iyo Degmooyinka xeer Lr. 23 ee mooshinka laga keenay. Sida mooshinka ku cad waxa uu ka hadlayaa hal qodob, halkaa qodob oo odhanay in la yareeyo tirada lagu ridi karo oo markii hore ahayd 2/3 (Saddex meeloodaw laba meelood) Maayirada iyo maayir ku xigeenada. Xeerkaas dhammaantiiba waxa ku jirta qabyo aad u badan sidii xildhibaanadii horeba ka dhawaajiyeen, xeerkan oo runtii qodobadiisu badan yihiin oo 90 qodob gaadhayaan, in hal qodob wax laga badalaa oo sidii caadada ahayd waxa uu marayaa Golaha Guuritida, annigu waxaan qabaa hal qodob inaynaa inta waynu wax ka badelno guuritida u gudbin, maadaama oo qaladaad badani ku jiro waxa wanaagsan inaynu xeerkaa qabyadaa badan ee ku jirta furno ka dibna si wanaagsan looga doodo oo qodobkaasina ku jiro.

Sida xildhibaanadi hore ka dhawaajiyeen qodobkii tirada oo kale, laakiin haddii aynu hal qodob aynu doodeena ku salayno, waa ogtihiin inaga lafteen wakhti badani inooma hadhsana, waxa loo baahan yahay inaynu ka tagno xeerar dhaxal gal ah, xeerkana laguma saleeyo qof aad diidan tahay Matalan waxa lagu saleeyaa wax mustaqbal ah. Xeerkani wuxuu u baahan yahay golayaasha deegaanka mustaqbalka inaynu wax ka eegno oo lala akhriyo xeerka doorashooyinka xeer Lr. 20 oo maamulada goboladu ay ku jiraan, oo shuruudaha lagu soo dooranayo wax ka badelno.

Matalan magaalooyinka waaweyn oo kale ninka maayirka noqonayaa inaynu ku xidhno shuruud odhanaysa in qofkaasi hanti lahaado oo kale, haddii imika aynu mid badelno oo mid kale yimaado wax may is bedelin. Markaa banidaamka waxa la raaciyaa shuruud adag oo lagu xukumi karo, haddii ay tahay dhinaca maaliyadda iyo awoodihiisaba in la taabtaabaa muhiim ah.

Waxaan soo jeedinayaa in xeerka dhawr qodob oo ka mid ah aynu galno oon xildhibaanadii iga horeeyey ku raacayaa dhawr qodob oo tiradu ka mid tahay, oo lagu xulanayaa ka mid tahay Maayirka iyo Golaha deegaankaba inaynu dhawr qodob ka dhigno, dhawrkaa qodobna ka doodno, dabeetana isaga oo dhawr qodob ah aynu guurtida u gudbino oo qodabka 66aad ku jiro. Markaa waxaan odhanayaa qof qof ku badel macno ma samaynaysee aynu ku darno cida la

xisaabtami karta haddii aynu Public iyo xildhibaanada uu ka tirsan yahay. Yeynaa qaylo ku dhamaynin maadaama doorashadiina soo dhawdahay oo xeerar kale oo wax ka badel u baahana la keeni doona, markaa Guddoomiye waxaan odhan lahaa aynu guddi u saarno xeerkan, taas oo ku soo darta qodobada wax laga badelayo kuna soo darta ajendaheena.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Cali Xaaji Maxamed: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan salaamayaa Shir-guddoonka sharafta leh iyo Golahaba. Waxaan u malaynayaa in xeerkan aad iyo aad loo falanqeeyey dhammaanba, annigu waxaan leeyahay sidii ay xildhibaanadii horeba sheegeen doorashadii wax yarbaa ka hadhay, markaa wakhti cidiidhiya ayaynu hadda ku jirnaa. Waxaan u malaynayaa in aanay ku haboonayn in wakhtiga imika la joogo aynu si hoos hoos ah u gudda galno xeerkan.

Waxaan leeyahay Golaha deegaanka ee soo socda wakhtigeeda ha lala sugo, imika xeerkani sidaas uu yahay doorashada ha lagu galo, doorashada oo aan filayo inay ka hadhay wax sannad ka yar wakhtigeeda halala sugo. Ta kale waxaan u qaybin lahaa laba mid waa; ta koowaad ee ku saabsan Guddoomiyayaasha iyo ku xigeenadooda, waxaan leeyahay haddii taa la guddo galo oo la faadhfaadho Iyana difaac ayey gali doonaan, dabadeedna wakhti badan oo aan loo baahnayn oo arrintaa ku habsaano ayaa iman doona, waxaan leeyahay sideedaa ha loo dhaafo.

Ta labaad waxaan leeyahay guddi ha loo saaro wixii mad-madaw ah ee ku jira ha la hagaajiyo, markaa ha lala sugo doorashada iyo wixii ka dambeeya xeerkani wakhtigan kuma haboona guddo galkiisu iyo wax ka bedelkiisu dib ha loo dhigaan leeyahay. Waad salaaman tihiin.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Cumar Saleebaan Axmed (Sanweyne):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Asaaltu calaa sayidaana Muxamed Wa calaa aalihii Wa saxbihii wa salam. Guddoomiye aniga waxay horta ila tahay marka hore. Waxaan ku talin lahaa oo soo jeedinayaa lahaa xildhibaanadu rayigooda nin kastaa wuu u madax bannaan yahay. Nin kasta in rayigiisa loo daayo oo aan rayi kale lagu khasbin taasi waa iga tallo oday. Waxaan ku darayaa intaas xeerkan inaynu guddo galno had iyo jeer marka doorasho dhawr bilood ka dhasan tahay ayeynu orodnaa in imika wakhti fiican baynu haysanaa oo laga gun gaadho oo meel la sii dhigo way fiican tahay.

Anigu waxaan aaminsanahay kaw hal qodob inta uu golaha ka baxo oo guurtida loo gudbin ay inagu tahay fadeexad iyo ceeb, inaan aqoon badan u lahayn shuruucda iyo habsami u socodka xeerarka, waxa kale oo ay u muuqanaysaa inaynu u jeedno cid gooniya ee aynaan masxalada umadda u jeedin.

- Marka hore waxaan ku talin lahaa in qodobkan mooshinka laga keenay laga doodin kaligiiye xeerka laga wada doodo.
- Waxaan soo jeedinayaa oo kale marka aad doonayso inaad xeer akhrido in arrin isku mid ah Shan xeer ka dhex baadho maaha. Xeer Lr. 20 waxa ku jira arrimo Golaha deegaanka xeer Lr. 23 waa xeerkii Golaha deegaanka. Markaa waxaan leeyahay wixii Golaha

deegaanka ah ee ku jira Xeer Lr. 20 loo soo duwo xeer Lr. 23 oo ay noqdaan hal xeer oo tixraaciisa hal meel laga dooni karo.

- Waxaan anigu leeyahay tirada Golaha deegaanka lama yarayn karo, sababtu oy tahay Matalan Hargeisa waa 8 degmo 25 xidhibaan ayaa ka soo baxa Hargeisa, markaad qaybiso degmo waliba saddex ayey helaysaa, xabada soo hadhayna maayirka ayey noqonaysaa.

Waxay ila tahay hargeisi waa magaalo balaadhan in degmo kastaa saddex hesho waa wax maquul ah oo caddaalad ah, laakiin sida xeerku yahay waa maamul mushkilada taalaana waxa weeyaan xildhibaanadii Golaha deegaanku ma fadhiisanayaa xafiisyadii degmadooda oo dhamaantood waxay isugu imanayaan xafiiska dawladda hoose. Haddaad tagto dawladda hoose waxaad moodaysaa in dagaalkii labaad ee dunidu ka dhacay inta mid xiiqsan, inta mid fayl sidata, inta mid budh sidata, inta mid hareeraha eegaysaa oo meel uu u socdo waayey yaab ayaad u soo baxaysaa, sababtu oy tahay dee ma fidhiisanayaa degmadoodii loogu tallo galay inay fadhiistaan oo mashaakilka shacabka halkaas ay ku xalilaan.

Mida kale xildhibaano ayaa waxay yidhaahdeen Maayirku ma fadhiisto dee dadka halkaa tumani marka Maayirku soo galo sidii markaanu yar yarayn Burco afar Hindi ah iyo saddex gaal ayaa joogoo marka ay soo galaan ayaanu daba yaaci jirnay, waxaad moodaa Maayirku marka uu soo galo gaadhigiisa hareeraha la haystaa oo markii mushkiladii dadka cid xalisa la waayey nin kastaa Maayirkuu ku cararayaa.

Markaa haddii wuxuu maamul yahay waa in qasab laga dhigaa xeerka inay fadhiyaan degmooyinkoodii oo shacabka halkaas ugu taliyaan markaana Maayirka waa la heli lahaa.

Taan ku darayaa waxa weeye xaga miisaaniyadda. Haddii aynu Barlamanka nahay sannad kasta miisaaniyadda ayeynu ansixinaa miisaaniyadda aynu ansixinaa waa ta dawladda dhexe iyo ta dawladaha hoose. Miisaaniyadda dawladda dhexe guddi ayeynu u leenahay oo barlamaanka ayaa ka dooda oo aad ayeynu u baadhnaa oo ilaha dhaqaaluhu ka soo baxay ayeynu tagnaayo, wax badan ayeynu isu miisaanaa oo hawl badan ayeynu ka galnaa, laakiin dawladaha hoose figures ayaa meesha la keenaa. Anagu wasiirka maaliyadda waanu kala hadalnay haddaanu guddida dhaqaalaha nahay ma rabno ayaanu nidhi figures, laakiin waa in aanu ogaanaa halkay ka soo baxday iyo halka ay ku baxday oo wax kasta ogaanaa.

**Waxaan soo jeedinayaa annigu rayigayga: -**

- Guddoomiye xeer halka qodob oo mooshinka laga keenay ma gudbin karno, waayo waxay inagu tahay aqoon darri inaynu cid u jeedno ayaa meesha ka muuqanaysa, waxaan leeyahay yaan la gudbinin arrinkaas. Haddii la samaynayana waa in uu noqdaa wax wada socda oo soo jeedintii badnayd ee xildhibaanada labada cisho la raacaa oo guddidii shuruucda in loo gudbiyo oo doodii xildhibaanadu lagu daro oo xukumada iyo Guddida doorashada lagala tasho ka diba Golaha lagu soo celiyo ayaan qabaa.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Axmed Maxamed Nuur: -** Aslaamu Calaykum warax matulahi Wa Barakaatu. Mudnayaal doodu ilaa shalay way socotay xildhibaano badan oo iga horeeyeyna way jiraan. Horta xildhibaanadaa iga horeeyey waxaan ku taageersanahay in xeerkan guddo gal weyn lagu

sameeyo, waayo dal daloolooyin badan baa ka muuqda wayna haboon tahay Golaha wixii inaga baxayaa wax hufan oo la kala haadiyey inay noqdaan. Xeerkan dib ha loo eego oo waliba guddi gaar ah ha loo magacaabaan annigu taaganahay.
Waxa jira xildhibaano badan oo yidhi tirada xildhibaanada Golaha Deegaanka ha la yareeyo waan ku taageersanahay in la yareeyo waayo way badan yihiin, badnaantuna rabash iyo arbushuunbay keentaa intaasaan ku dhaafayaa.

Arrintan mooshinka ee dooda keentay, waxaynu ka wada war qabnaa muddo xileedkii Golaha Deegaanku inoo dhan yahay, iyada oo dhawdahay hadaynu nidhaahno tirada lagu ridi karo Maajirka iyo Ku xigeenkiisa ha la yareeyo anigu macquul uma arko, anigu waxaan leeyahay mooshinkani uma baahna simple majority ee wuxuu u baahan yahay Absoluty majority. Simple majority-gaasi khal khalkiisa, rabshadiisa iyo dhibaatadiisa ayuu keenayaa. Nimankani muddo dheer ayey meesha soo fadhiyeen oo hawsha gacanta ku hayeen, imika ka hor ayuu mooshinku ku haboonaa sannadkii inna dhaafay, kii ka sii horeeyey, laakiin haatan mar haddii wakhtigii gebogabo ku dhawyahay waxaan leeyahay taa yaan la isticmaalin sidan oo absolutely majority-gaa ha loo daayo. Waxaynu ka wada war qabnaa haddii simple majority laga dhigo in bishiiba laba Maayirka iyo Maayir ku xigeenka aynu yeelan doono, qoladan meesha joogtaana in badan ayey meesha fadhiyeen kolay qorshayaal ayey leeyihiin, mashaariicbay gacmaha ku hayaan. Haddii maanta la yidhaa ka soo dareera kuwa kale yimaadaana ee Maayirka iyo Maayir ku xigeenkuna meel ay wax kaga hagaagaan garan maayaan wakhtigiibaa gebogaba ah mashaariicdaa ay gacanta ku hayaan halkaasay ku baaba'aan.

Mudanayaal waxa aniga ila haboon waar nimankaasi sidaa ay u fadhiyaan ha u fadhiyaan oo sidaa ku dayno, iyagan halbaan u jeedinayaa Maayirka iyo Maayir ku xigeenada waar mudaad meesha soo fadhideen umaddii aadbay u cabanaysaa qofka is yidhaa maayirka hawl ka soo qabso, waxa laga yaabaa in aragtidiisu laba bilood ku qaadato. Waar ilaahay ka baqoo umadda masuuliyad ayaad u qaadeene xafiisyada u fadhiista oo umadda kala haga, aadbuu dadku ugu dhibaataysan yahay aragtidiina.

Mudanayaasha Golaha Wakiilada waxaan leeyahay waar dalka ayeynaan is qabsi hor leh, dhibaato iyo muran joogta ah oo maalin walba mid la badelo, inaga lafteena muddo xileedkii wuu inaga dhan yahay oo wakhti yar ayaa ka hadhay oo nimanka isku wakhti ayeynu nahay arrintaasi sideedaa aynu u dayno, Golaha inaga dambeeyaan iyagay u taalaa siday ka dhigayaan inagu aynu qodobkaas sidiisa u dayno.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa.

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac Nac):-** Shir-guddoonka iyo Xildhibaanada Waan salamayaa. Salaan ka bacdi waxay ila tahay in dooda xeerkan aynu ku eekaano, ayeynaan sida kuwa Muqdisho isku haya ee ku murmaaya digaaga iyo beed keeba hor dhasha yeynaan isku wareegaysanin ee qodobka inoo yaala aynu ka hadalno. Sidii xildhibaanadii iga horeeyey sheegeen waxaynu joognaa wakhti kulul, doorashooyinkii Barlamaanka iyo Golaha Deegaankaba way inagu fool leeyihiin oo maanta haddii aynu sii dayno saadambaa lagu qabanayaa fadhiyaashii oo buuq ayaa ina galayaa, waxaan leeyahay aynu u dayno sidaa ay u fadhiyaan, inaguna aynu

sidaa ku taageerno oo haddii la doonayo in wax laga qabto xeerka aynu wax ka qabano, laakiin imika sidoodaa ha loo daayo ayaan leeyahay SCW.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte):** Guddoomiyaha, Xildhibaanada, Saaxafada iyo Martidaba waan salaamayaa. Aniga waxay ila tahay Soomaalidu waxay tidhaa hadalku haduu mid yahay laba lagama dhigo. Doodu waxay ku socotaa mooshin. Anigu mooshinka markii la keenay ma joogin xildhibaanada ayaa keenay waxaanu ku saabsan yahay arrin qudha.

Marka ugu horaysa waxaan qabaa sharciyan mooshinka dooda waa akhriska koowaad ee dooda, anigu waxaan qabaa inay waajib tahay mooshinkaas oo haa iyo maya kolba kuu doono ha u dhacee oo codbaa loo qaadayaa isaga aynu iska dayno iyo xeerka aynu raacino midna maahee iyagu way taagan tahay oo Golahay taalaa doodu isday doonto ha u dhacdee waa qasab in cod loo qaado. Waxaanse qabaa marka aynu qodobo sharci ah ka doodayno inaynu cid madaxa ku qabano maaha, inaynu dano kale iyo arrimo kale xasuusano maaha waxaynu ka doodaynaa waa inuu sharciga ku saabsan yahay arrin mabdi’iyan arrin guud oo rasmiya oo xeerka dalka ku saabsan.

Waxaan qabaa mooshinkan in mabdi’iyan sida loo keenay inay tahay in qodobkaasi runtii uu dastuurkana diidan yahay, dimuquraadiyadana diidan yahay. Cabashada faraha badan iyo ciladaha faraha badan ee dawladaha hoose ku dhacday isagu sabab u yahay, maxaa yeelay qof kasta oo xil dawladeed hayaa inuu cid accountable u noqdo weeye. Qof kasta oo la doortay in cidi la xisaabtanto cidina xilka ka qaadi karto weeye. Waxaynu gaadhsiinay heer aanay suurto gal ahayn in lala xisaabtamo, in xilka laga qaado mabadi’dii asaasiga ahaa ee dumuquraadiyada doorashadaynu duudsiinay. Waxaan qabaa arrintaasi mabdi’iyan ayey sax u tahay in la keeno heer ay Maayirada Dawladaha hoose accountable u noqdaan cidii dooratay.

Guddoomiyaha Barlamanku wakaa inna hor fadhiya hadeer waa kursiga seddexaad ee dalka 42 cod weeye xilka qaadistiisu, Madaxweyhana dalka waa 42 mooshinka xilka qaadistiisu. Miyaanay ahayn wax waydaarsan nidaamka marka aynu Maayiradii sidaas ka dhigno. Maayirka iyo ku xigeenkiisa ridi mayno ee ninka haysan kari waayey kala badh xildhibaanada, waxay muujinaysaa guuldaradiisa. Waxaanad moodaa dooda aan hadda dhagaysanayey qaarkeed in diiradoodu ahayd yaan maayirada la ridin, inagu mana ridayno mana dooranayno, anigu sharcibaynu toosinaynaa hagaajinaynaa. Sharcigu wuxuu ku quman yahay ee uu mabdi’iyan ku hagaagsan yahay.

Yaanay xaga dambe inaga jirin qof la ilaalinayaa. Anigu waxaan qabaa rayigayga midna maayirada ridi mayno, midna lama col ihi, midna kuma duulaan ihi, laakiin waxaan qabaa xeerkaasi waa qodob mabdi’iyan ka hor imanayay oo khilaafsan Dastuurka iyo hanaanka doorashada iyo dawlad wanaaga intaba waa mid khilaafsan natiijadiisana waynu aragnay inay umadda oo dhammi ka cabanayso.

Maayirku giddi buu madax u yahay waxa laga rabaa accountability iyo inuu isku wado xildhibaanada Golahiisa Deegaanka oo dimuquraadiyadda ku baraagtiis gareeyo Golaha dhexdiidsa. Waxa qabaa in doodu markay dhamaato mooshinkan cod la galiyo siday doonto ha u dhacdee.

Waxa kale oo Guddoomiye doodan oo dhaaftay qodobkaas oo xeerkii guddo gashay,  waxa ka muuqata horena aynu u ogayn in xeerkani u baahan yahay dib ugu noqosho oo xildhibaanada intii hadashayba waa sheegeen oo Maxamed Cali Xirsi baan filayaa inuu shalay faahfaahin aad u balaadhan sameeyey oo qodob badan wax ka bedel u baahan tilmaamay, waxaana weeye wax caadiya oo marka xeerka lagu shaqeeyo ay soo baxdo ciladaha ay leeyihiin oo u baahan wax ka bedel lagu sameeyo ama xeerkaba la laalo ama xeerku noqdo xeer shaqayn waayo, xeerkani maaha kuwii la laalayey waa xeer u baahan harumarin.

Xeerkii doorashada isaga laftiisa maadaama oo doorashadii soo dhawdahay guddiyadu waxay ku tallo jirtaa in dib u habayn lagu sameeyo oo uu la jaanqaado xeerka doorashada Golaha wakiilada, waxaana aad u wanaagsan maadaama oo xeerkan doorashada Golaha Wakiilada iyo xeerka ismaamulka iyo Gobolada iyo degmooyinku isku meel yihiin oo dib habayn toodo wada socdo.

**Waxaan guddoomiye soo jeedinayaa: -**

- In mooshinkan cod la galiyo dhinucuu doono ha u dhacee iyo in xeerkan Guddida Arrimaha Guddaha lagu soo wareejiyo maadaama xeerkan aan Golaha dhexdiisa lagaga shaqayn Karin waad salaaman tihiin.

**Guddoomiyaha: -** Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa;

**Md. Ibraahim Axmed Raygal: -** Waxaan salaamayaa Shir-guddonka iyo mudsanayaasha. Bacda salaam in kastoo oo qodobo badan oo ii qornaa ay xildhibaanadu hore uga doodeen, haddana waxaan doonayaa in aan inyar soo gaabiyo. Guddoomiye iyo Mudanayaal laba waxbaa iska keen galay oo kala ah Mooshinkii oo qodobka mooshinka la keenay wax ku dhex furmay dood xeerka Lr/23 ee ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka oo kan ah.  Markaa runtii xildhibaanadu dood wanaagsan oo sharaf leh bay soo jeediyeen waanan ku amaanayaa.

Anigu waxaan ku soo koobayaa oo kaliya qodobka mooshinka laga keenay iyo xeerka in aynu is waafajino oo wixii wax ka bedel lagu samaynayo aynaan qodobkaas gooni u qaadan oo aynu ku dabaqno xeerkaas dalka lagu maamulo. Xeerkan marka kowaad waa in lala akhriyo Xeerka Lr. 20.

Waxa kale oo jirta Kaabis iyo wax ku daris oo ah shaqadeena, laakiin mar walba cid baynu la kaashanaynaa xeerkana marka lagu shaqeeyo ayaa wanaagiisa iyo xumaantiisuba soo baxdaa, markaa waxaan u arkaa in Wasaarada Arrimaha Guddaha ama xukumaduba inay inala leedahay waayo iyadaa ku shaqaysa. Markaa waa in Guddida Arrimaha Guddaha iyo Guddi kale loo saaro wixii lagu daraayo in xeerka oo dhan isku wada qaadno, laakiin aynaan imika odhan qodobkaa kaliya cod u qaadaa taasaan soo jeedinayaa marka koowaad.

Marka labaad dhawr arrimood ayaa halkan laga hadlay waxa Matalan ka mid ahayd tirada oo la yareeyo, anigu waxaan taageerayaa tirada oo la yareeyo caasimada oo 25 laga doorto 16 xildhibaan Degmooyinka A. kuwa B ah 9 xildhibaan, kuwa C ah 7 xildhibaan iyo kuwa D ah oo laga doorto 5 xildhibaan.

Waxaan sidaa uga jeedaa way farabadan yhiin intaasoo guddi, guddi hoose iyo Guddi dhexe waxaynaan qaadi Karin weeyaan. Arrinta ku saabsan xasaanada iyo mushaharka waa inay noolaadaan oo mushahar qaataan Ayaan anigu taageerayaa ama gunno qaataan inaguba waan nool nahee Iyana ha noolaadaan xasaanadana xaq bay u leeyihiin oo lagama qaadi karo.
Waxa si faahfaahsan u sheegaya qodobka 47AAD iyo 54AAD ayaa xilkooda iyo sida looga qaadayo iyo wax walba xeerkaasay inoogu qoran tahay. Markaa waxaan soo jeedinayaa xildhibaanadu marka ay ka doodayaan xeerkan oo kale inay haystaan Xeer Lr. 23, Xeer lr. 20 iyo dastuurka oo Golaha iyo Arkiifiyadaba yaala, tani waxay inaga caawinaysaa in waxa aynu ka doodaynaa inoo saxan yihiin.

**Guddoomiye hadalkayga nuxurkiisa waxaan ku soo ururinayaa: -**

- In mooshinkan lagu daro Xeer Lr. 23 oo laga doodo una talo badsano dhexdeena iyo xukumada ku shaqaysa oo inala wadaagta. Waxa kale oo aan ku darilaa in la helo qodob odhanaya sideena in shir-guddoonka iyo Guddiyadaba xilka laga qaadi Karin sanadka u horeeya. Aadbaan Xildhibaanada u salaamayaa.

**Md. Farxan Maxamed Cali: -** MudaneGudoomiye aad baad u mahadsan tahay, anigu waxaan qabaa marka ugu haraysaba inaynu ku jirno dabayaaqadii muddo xilleedka oo doorashadii soo dhowdahay, horta marka hore maankeena aynu ku hayno in xiliyada doorashooyinka ama sanadka u dambeysa inaan la badalin Karin madaxda xilka haysa si aanu nidaamkii iyo kala dambeyntii u lumin waana qodob Dastuuriya.

Mooshinka markii la keenay waxay ku haboonayd in loo dhiibo la-taliyaha sharciga oo uu soo waafajiyo sharuucda iyo Xeerarka, sideedabana marka mooshin la keeno waa inaanu jihaysnayn oo cid ku jihaysnayn waana in si waddanimo ah uu mooshinku ama Xeerku u jihaysnaadaa oo aan sidii Xilhidhibaanadii halkan ka hadlayay ee C/raxman Dheere iyo Maxamed Jaamac noqon, markaa anigu waxaan qabaa Mooshinkani wuxuu u eegyahay Mooshin jihaysa oo cid ku jihaysan oo qof ku socda ilamana qurux badna.

***SIxitaan Cali Barre: -***Gudoomiye Xildhibaanadu xurmay kala dhex mudanyihin mooshinkana XIldhibaanaa keenay dhowr iyo afartan ah, waa in laga xishoodaa Xildhibaanada keenay, waa xaaraan in Xildhibaanku noqdo Microphone laga dhex hadlayo.

***Gudoomiyaha: -*** Xildhibaan Farxaan doodaadda sheeg xildhibaanadii keenay ha ka hadlin.

***Md. Farxan: -*** Cali Barre ma isagaa keenay Mooshinka?

***Gudoomiyaha: -***haa isagaa keenay.

***Md. Farxan: -***hadii uu keenay cali waxaa uu keenay baan ka hadlayaaye ha adkaysto muxuu la qaylinayaa, waxaa aniga fikirkayga iilla muuqda yacni dhadhankiisa mid jihaysan weeyi.

***Gudoomiyaha: -***Xildhibaan Farxaan ra'yigaaga ka hadal, jooji xildhibaanada mooshinka keenay iska daa.

***Md. Farxan*: -** Anigu waxaan soo jeedinayaa in Mooshinkaas aanu maanta meesha ku haboonayn oo la hakiyo markaa Mooshinkaas halkaas lagu joojiyo, laakiin doodayda waxaan ku darsanayaa in wax ka badal loo baahan yahay oo dhamaan Xeerarka Doorashooyinka wax ka badal loogu sameeyo.

**Md. C/raxman Abuubakar Good: -** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanaduba way salaaman yihiin. Horta Mooshinka sida fiican looga dooday waxa weeye waa arrin wayn oo tallo qaran waana hawl in badanba Golaha waajibaad ka saarnaa, waxayna ahayd in wakhti hore laga doodo oo la keeno waayo nimanka Maayaradu waa fulin hawl culus bay hayaan hanti badan bay maamulaan, sida xaaladooddu u socoto iyo cabashooyinka badan ee ka imanaya dadkii aynu ka wakiilka ahayn waxay ahayd in wakhti hore aynu keeno oo dadka ka qabano, waxa weeye Madaxweynaha ayaa laga dhigaa hal dheeri oo 42 xilka laga qaadaa, markaa in iyaga laga dhigaa 2/3 marka horeba khalad bay ahayd, hal dheerigu Marka lagu dhaqmo ayaa la ogoaan karaan dhib haduu leeyahay.

Waxaan anigu taageersanahay in laga dhigo hal dheerigaas ama simple majority oo ah kala badh tiradoodda oo hal lagu daray, waxa kale oo aan soo jeedinayaa kuna taageersanahay xildhibaanadii Siciid Cartan ka mid ka ahaa in Tiradoodda la dhimo xubnaha Deegaanka waayo culays dhaqaale mooye wax ka ma hayaann inta yar baana ka wax qabad badan inta badan, sidii Qodobkii ahaa in halkii Xldhibaanada ahayn laga dhigo xubin deegaan waan taageersanahay oo dhamaan qodobadii Maxamed Jaamac iyo Siciid cartan soo jeediyeen waan ku waafaqsahay oo ahaa in 9 Qodob wax laga badalo.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- In Qodobkaas Mooshinka laga dhigo hal dheeri ama simple majority oo ah kala badh tiradooda iyo hal.
- In Qodobada ay soo jeediyeen Xildhibaanadii iga horeeyay oo gaadhaya 9 Qodobna wax laga badalo oo aan iyaga ku waafaqsanahay.

**Md. Xasan Xuseen Shide: -**Shir-gudoonka iyo XIldhibaanada dhamaantiin ASC, salaam ka dib, xildhibaano badan hadlay oo laba cishay dooddu socotay waxaa la soo dhigay mooshin ka hadlaya Maayarada iyo ku-xigeenadoodu tirada lagu doorto xilkana laga qaadi karo oo ahayd 2/3 laga dhigo simple majority oo ah kal badh iyo hal, waana laguda galay oo waa laga dooday.

Anigu nin geel jire ah baan ahay oo maah-maahda aan garanayaa waa USHA DHEEGIYO USHA DHABARKABA ANIGAA KUGU DHIGAY ANAASE I DHIBAY buu geell-jiruhu hashuu jecel yahay ku yidhaahdaa, dalkeena waynu jecelnahay, markii horaa Golaha Wakiilada laga ansixiyay in laga dhigo hal dheerigaas waxayna keentay rabshadii aynu ogayn oo bishii walba inay aqal gaar ah fadhiistaan 10 xubnood oo Golaha ka tirsani ka hadlayaan mooshin ka hadlaya xil ka qaadista Maayarka shaqadii umadu ka sugaysayna kaga mashquuleen, markii la arkay dhibtaas ayaa hadana waxaa la ansixiyay Xeerkaas Qodobka 66aad farqadiisa 5aad oo ka dhigaysa 2/3 wixii ka dambeeyay waa la yara hakaday anigu waxbay qabteen ma odhanayo laakiin sidii ay isugu marnaadeen aad bay ugu fiicnaadeen oo aakhirkii waxbaa dhaqaaqay.

Iminka doorashadii Golayaasha Deegaanka iyo inagaba waxaa ka hadhay sideed bilood, hadii aynu maanta badalno qodobkaas sideeddaas bilood sideed Maayar baa is-badalaya  oo iman doona wax allaale wax soconayaana ma jiraan, aniga marka waxay illa tahay inaynu xilligan soo hamba-barno may ahayn inaynu xili sanad iyo lababa ka hadhsanyihiin bay ku haboonayd, iminka Madaxweyne Cusub baynu dooranay, waynu la soconaa oo Muqdisho dagaal culus baa inaga socda, sixir barar baa umada haysta, shirkadihii Xawaaladaha iyo isgaadhsiinta ayaa sharcigii gacanta ku qaatay oo umada u yeedhinaya, marka dalka oo dhibaato ka badani haysato inaynu carqalad kale ku furno looma baahna.

**Waxaan ku raacsanahay Xildhibaanada**

- In xeerka wax laga badalo lanna hagaajiyo oo lagu beego Golayaasha cusub ee iman doona, marka wixii lagu hagaajinayo lama diidana ee in fulin kuwan iminka jooga lagula dhaqaaqo anigu taas ma raacsani, waxaana soo jeedinayaa in sidooddaas loo daayo.

**Md. Cali Maxamed Aadam (Calibarre):-** ASC, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Shaqaalahaba Salaanta Islaamka ka dib, sida aad wada markhaati ka ahaydeen Golaha waxaa la keenay Mooshin xildhibaanaa keenay waa la akhriyay oo wuu sugmay, La-taliyaha Sharciga loo dhiibay oo sheegay inuu sharci yahay, Procedure-ka loo marro Mooshinada iyo shaqada Goluhuna waxay ku caddahay Dastuurka, Waajibaadka Golaha Wakiilada waxaa ka mid ah in Xeerarkii ay ansixiyeen ku shaqayntooda, wixii dhaliil ka soo baxa iyo kormeerkooda iyo dabagalkooda iyo sidoo kale wax ka badalkooda Waajibaadka Golaha ayay ka mid tahay.

Mooshinkan waxaa loo soo jeediyay in Xeerka la saxo, Xeerarkana marka lagu shaqeeyo waxaa soo baxa Dastuurka ma ka horimanayaa mise wuu waafaqsan yahay, maxaa ciladdo jira dabadeedna dib baa laga saxaa, anigu Mooshinka ragii soo jeediyay baan ka mid ahaa, waxaanu u soo jeedinay in Xeerka la saxo, absolutely wuxuu khilaafsan Dastuurka Qodobka 66aad ee Xeerku oo odhanaya 2/3 baa lagu ridi karaa Maayarka iyo Ku-xigeenka, anagu cid gaar ah uma jeedno, wax ha la ridona ujeedaddu maaha, Goluhuna in badan buu shaqaynayay, Xeerar badan oo inaga baxayna waxbaa ka khaldan, inaynu sanadkaas hadhay saxno wixii inaga khaldamay weeye Ujeeddayadu.

Haddii rag wax ku kordhiyay oo la yidhi Xeerka oo dhan dal-dalool baa ku jira waxba kama qabno oo hadba ra’yigu meel buu joogaa wax kastana marka laguda galo ayaa rayiyada la isku biiriyaa oo qofwalba wixii u soo baxay sheegaa ka dibna taasa lagu go’aan qaataa, Qodobkani wuxuu khilaafsan yahay Qodobka 96aad Farqadiisa 1aad ee Dastuurka oo sheegaysa in Madaxweynaha lagu ridi karo 42 cod, maadaama Dastuurka uu ka horimanayona in Dastuuka lagu saxo weeye ujeedayadu, nin walba calooshiisa wax ku jira ilaahay baa og dhowr iyo afartankaas aanu ku saxeexnay cid ujeedo gaar ah lahayd iyo cidaan lahaynba anagu miyaanu garan karnaa Illaahay baa calooshiisa oge.

Xeerka in la saxo oo dastuurka lagu saxo weeye qodobkaasina gabi ahaanba Dastuurku ka soo horjeedaa, wax la is hortaagi karona maaha, cid gaar ahna looma jeedo, hadda cid ha la riddona ma lihin, sharci baynu saxaynaa, markaa horta arrintu waa sidaase ha la fahmo.

Gudoomiye waxaan rabaa Mooshinka Qodobkaas sidiisa Cod loogu qaado Xildhibaanadu ha diiddaan oo dastuurka ha jabiyaan ama ha ogolaadaane, ujeeddo iyo cid kale oo hadashay anigu ka hadli maayo, Qodobada kale ee la soo qaaday ee rag badani sheegeen in xeerka wax badani ka khaldan yihiin waa muhiim.

Sideeddaba Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka dalka Gole Gobol baa jira oo dastuurka ku qoran oo aynaan waligeenba ka hadalin mooji wax looga waashaye ciddina ma soo qaado waana dastuuri, tan Demgooyinka ee la hirgaliyay waxaa sheegaya laba saddex qodob sideeddabana Golaha Deegaanku wuxuu hoos tagaa Waaxda fulinta ee Qaranka, wuxuu dastuurku leeyahay waa Xeer-dejin, xeer-dejintaasi maaha tan inaga oo kale ee Qaranka guud oo la mid maaha waxay dejiyaan xeer-hoosaadyadooda iyo waxay ku shaqaynayaan, laakiin dastuurka waxaa ku qoran in Xeer-hoosaadyadoodu aanay ka hor iman Karin Xeerarka Qaranka ee Golayaasha Baarlamaanku ansixiyeen ee Madweynuhu saxeexay iyo Dastuurka Qaranka waana sharci oo dastuurkay ku qoran tahay. Markaa in Xeerkan Lr. 23 in wax badan laga saxo wixii ka khaldan waa muhiim oo waa loo baahan yahay.

**Sidaa darteed Mudane Gudoomiye Waxaan soo jeedinayaa anigu: -**

- In Mooshinka sidiisa loogu coddeeyo oo cod loogu qaado. Iyo
- in Qodobadaas Xildhibaan Maxamed Jaamac, Siciid Cartan iyo ragii kale soo jeediyeena waxaan anigu soo jeedinayaa in Gudidda Arrimaha Gudaha loo dhiibo oo waajibaad hada ka bilaabma looga dhigo oo la yidhaahdo kana soo shaqeeyaan ama Gudi Ad hoc Committee ah ha loo saaro oo muddo kooban oo 15 cisho ah wax kaga soo qabtaan.

**Md. Xaashi Xuseen Caabi: -**Shir-gudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, Gudoomiye horta Xeerkan aynu ka hadlayno inaga keenay oo samaynay Xeer lr. 23 waxaynu u keenayna baahi jirtay oo sidaa iminka ay ka dhawaajiyeen madaama ay inagu cusbayd doorashadii deegaanku khaladaad badan baa ka yimi, itaalkii waxaynu islahayn wax saxa, waxaa ka yimi isqabqabsi badan, isqab-qabsigu maaha cudure waa caafimaad oo ninka la garan waayo ama xildhibaanadii deegaanka ee ay golaha wada fadhiyeen tixgalin waaya oo qiimeyn waaya waxaa imanaysa inay badalaan oo yidhaahdaan aynu iska badalno inagaa dooranaye maaha cudure waa dabayl caafimaad baan qabaa.

Markaynu 2/3 ka dhigaynay hadaynu eegno doodeheenii waxaynu nidhi waa tijaabo oo meesha tijaaba ku jirtay bal si waxani aynu eegno, tijaabadii waxay keentay in Maayaradii ay doorteen Golayaasha deegaanku ay wada digteetar oo magaala walba noqotay one man show, hadaad borama ilaa bari waxaad arkaysaa maayarkii uun, hantidii umadu daayac bay noqotay oo isaga ku tagrifala, waxaa ka sii daran mid waliba koox buu urursaday, waxa kale oo ku jirta cashuuraha dadka kadeedan albaabada lagala baxayo oo reer odaygii iyo islaantii ka maqan yihiin baa lagala

baxay dabadeedna caruurtii baa iska dareerta magaaladana wada gasha, markaa baahi baa keentay, iminka baahi baa keentay inaynu ku noqono tiradii.

Xildhibaanadii halkan ka dooday, doodoodaas waxa ka mid ahaa in Xeerka qodobo badan la eego oo ilaa 9 qodob wax laga badalo Xeerka, ceeb maaha ee waa garasho, hadii la yidhaahdo waa khalad oo waynuu ku soconaynaa waxba ma nihin. Markaa sidii la sheegay tiroyinka Xubnaha Golayaasha deegaanka ha la yareeyo waayo taasi waxay dawo u tahay in hantidii yarayd ee umadu ee meesha ka soo baxaysay haday tahay cashuur iyo haday wax kale tahay inay iyagu kala qaybsadaan oo aanay meelihii ay ka ahaayeen aanay waxba ku celin, waxaaba timi inay yidhaahdaan war bishii lacag baynu u baahanahaye aynu cashuurta kordhino, guryaha aynu lacag badan ka qaadno oo kuwa fooqyada iyo kuwa kale mid walba lacag kala duwan aynu ka qaadno.

Markaa war khalad badan baynu galnay hadaynu Golahan nahaye, khaladkeena aynu maanta saxno, kama hadlayno kuwa maanta joogna ee yaynaan khaladkeena difaacin, waxaynu ka hadlaynaa kuwa soo socda, kuwa ka dambeeya, markaa Xeerkan waa inaynu hagaajino qodob wanaagsan baynu ku taaganahay wixii khalad ah ee ku jira Xeerkaa waa inaynu badalnaa, WSC.

**Md. Maxamed Cismaan Bulqaas:-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada waan salaamayaa ASC, Xeer Lr 23 aad baa looga hadlay qodobka la keenayna xeekru ka mid yahay mar hadii Golaha la keenayna in la dhex galo oo qodobo badan wax laga badalo, waxaan rabaa inaan wax ka badalka xeerkaas aan soo dhoweeyo qodobo ka hadlo, waxaan ka horjeedaa in la yidhaahdo Xildhibaano maaha xubnaha Golayaasha deegaano madaama la soo doortay oo deegaano soo doorteen anigu in la yidhaahdo waan ka soo hor jeedaa sharciga iyo meelkasta xasaanad buu ku leeyahay cid ka hor istaagi kartaa ma jirto, aniga gaf bay ila tahay in sidaas oo kale loola hadlo.

Xaga tirooyinka anigu waxaan qabaa in la kordhiyo oo sidii shaqo abuurkii oo kale ayay ka qayb-qaadanaysaa, Hargeysa oo kale 35 xubnood halkay ka yihiin 25 iminka, deegaanada 21ka waxaan ka dhigi lahaa 28aad, kuwa 17ka ah 23 xubnood in laga dhigo waxayna keenaysaa shaqo abuur, hadii aynu sii yarayno waxaa meesha ka baxaysa shaqo abuurkii la waday oo dadka in la bacsadaa soo baxaysa.

Qodobka iminka ina horyaal ee Mooshinka ah runtii anigu wakhtigan ma aaminsani in wax laga badalo oo xili hore ayay ku fiicnayd, iminkana doorashadii baaba dhow, tusaale waxaa ah ilaa 12 maayar baa imanaya sanadkaas hadhsan oo xaqiiqa wax badan baa isbadalaya oo nin walba wuxuu iska eegayaa goorma lagu badalaya oo maayaradii maba shaqaynayaan, markaa intaas yar ee wakhtiga uga hadhay in sidiisa loo daayo ayaan soo jeedinayaaa, hadii la doonayo in wax laga badalo qolada cusub ha lagu tijaabiyo, malaha rag xildhibaanada ka mid ah baa si wax uga arkay biyaha hoostooda oo maayarada u jeedda.

**Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa: -**

- In Qodobkaas sidaas uu iminka yahay ha laa dooyo ayaan qabaa oo wakhtigooda ha ku dhamaystaan, wixii wax ka badal ahna kuwa dambe aynu ku tijaabino.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-**Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada waan salaamanyihiin, taariikhda iyo maktabadaha kutubka marjaca ah waxaa loo sameeyaa in marka qofku ilaawo inuu tago maktabada dabadeedna dib u soo qaataa wixii ka horeeyay waa intaas oo uu ilaawaaye, Golahani wuxuu ilawsan yahay inay tii horena iyagu keeneen, tana iyagu keeneen sababta ay u keeneena ahayd meeshii oo baaba'day iyo wadankii oo waxba loo qaban waayay, tan ay ka ordayaan iminkuna waa taas ay ka ordayeen, war goormaydun wax u qabanaysaan wadanka oo wax u taraysaan tii hore idinkaa lahaa waa baaba'a tan idinkaa leh waa baaba'a , war caqliga ma gashee Dastuurku siduu leeyahay aynu ku noqono waxna hagaajino.

Waxa ugu horeeya ee aad ka hadasheen waa nin ha la badalo, war Nabi Maxamed CSW wuu dhintay diintiina sideedii bay u socotaa, hadii nin la badalo dastuurku siduusuu u soconayaa, todoba qodob oo dastuurka ku jira ayaydaan ku dabaqin dawladaha hoose oo waxay doonaan sameeya, nin baad tidhaahdeen ha la badalo, waxa ka mid Qodobka 110aad ee Dastuurka kamaydaan hadlin waxaad ka hadasheen hebel ha la badalo uun, waxaa ka horeeya khilaafka dastuuriga ah ee ay ku kacaan Golaha deegaanku ee ku taageerayso Wasaarada Arrimaha Guduhu oo Baarlamaanku ku taageerayo waana jariimad iyo dambi aynu isku raacsanahay gidigeen, cashuurtii baa sidii la doono loo galay oo la korodhiyay.

Waxaan xasuusta barigii AHN Qaybe oo la kordhiya xabaala qodka iska daa aqal la dhisaye oo aanu maayarkii hore u yaadhnay oo nin Gudidda arrimaha gudaha ku jiray intuu u tagay ku yidhi iska kordhiso dababdeedna Qaybe dee wuxuu ahaa nin aduun la soo shaqeeyay loo yeedhay oo uu ku yidhi kordhi ilayn dastuur iyo shuruuc baad meesha ku fadhidaaye yaa ku yiri hareer mar, dabadeedna waxaa loo yeedhay garyaqaankii sharci laga qoray oo Maxkamada dastuuriga loo diray anaga isku duuduubnay oo nidhi madaxyahaga ku saamax shan sano oo xadhiga ayuu ka badbaaday, markaa waynu ognahay iyaga, idinka iyo Wasaarada Daakhilguba sharciga jabiyeene maxaa qof la eryaa uu tarayaa waa mid.

Shalay buu wadanku ka qayliyay oo ku rogmayday sharcigii hore ee aynu samaynay, iminka ayaynu u ordaynaa, war dulmiga aynu ka dayno xukuumada, iyaga iyo inaguba, kii hore waynu ku baaba'nay kana waynu ku baaba'anaye xal aynu keeno oo inagu masuuliyada aynu qaadno ama Wasaaradii Daakhiliga ahayd ee la xisaabtami wayday ee u sii daysay 10 sanadood faydadaas ay wadanka ku wadaan, halkan waxaynu ka diidnay ina Uurcade oo jooga in kaadhka lacag lagu qaato, maanta $40 buu maraya kaadhkii, bal eeg, rag inaga mid ah baa soo qaatay kaadhkii, markaa sharciga ma iyaguun baa jabiyay mise idinka jabiyay, qaada masuuliyada aynu leenahay, waxaynu nidhi bilaash baa kaadhka aqoonsiga lagu qaadanayaa, maanta $40 buu marayaye yaa ka masuul ah?.

Qodobada 10$^{aad}$ iyo 11$^{aad}$ ee Dastuurku wuxuu odhanayaa waa la kala diri karaa, yaa kala diraya, wuxuu leeyahay Golaha Wakiilada ayaa kala diri karra markay sharci u sameeyaan, ma sharci baynu u samaynay? Intaynu leenahay nin iyo laba ha la eryo gidigoodba waa isku mid, markaa labadaas qodob oo dawladaha hoose ka hadlaya bal dib ugu noqda, sharciga ka soo baxa dawladaha hoose waa sharci uu go'aamiyay baarlamaanku laakiin markuu ka horyimaado

qaanuunka wadanka u yaala ee Dastuurka iyo Xeerarka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan aan sharci ahayn.

Tirada waa la goyn karaa waana la yarayn karaa, wana la badin karaa, ingriiska cayimi jirayba, ninka waa la soo doortay oo xasaanad buu leeyahay, nimanka xoghayaha iyagu ha isku doortaan leh waa Dastuuriye ha jabinana Dastuurka markaad baabi'iso qodob Dastuuriya dee qodobkaagii baa buraya, degmooyinka A and B ee aan bixin karin takaaliifta way iska joogaysaa sida Dastuurku qorayo, inaguna saddex iyo afar baynu qornay dabadeedna wixii gobolka ka soo baxayay D iyo C baa qaadanaya, markaa labadaas mooye inta kale mid wax soo saartaa ma jirto.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- War tii horena waa lagu jabay, tan aad imika wadaana waa lagu jabayaa ha laga joogo lix bilood baa hadhaye.
- Waa in Guddda Arrimaha Gudaha ee Baarlamaanka iyo Gudidda Ilaalinta Hantida Qaranka awood bay u leeyihiin inay xisaabaadkooda baadhaan oo eegaan hantidooda iyo wixii ka khaldan, check and balance baa meesha ka maqan, markaa Gudiyadaasi waajibkooda waa inay ka gutaan.
- Sharcigan 66 Qodob buu ka kooban yahay, in 66 qodob dib loogu noqdo ayuu u baahan yahay.
- Todobaddii qodob ee aan soo sheegay ee dastuurka ka soo horjeedayna waa in dib loogu noqdaa.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise: -**Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddonka, Mudnayaasha, saxaafada iyo shaqaalahaba waxaan leeyahay Asaalumu calaykum Waraxmatulaahi wa barakaatu.

Mudane guddoomiye hortu wakhtigu waa goor dambe dooduna in badan ayey socotay anigu waan soo koobayaa. Doodaydu waxa weeye horta waxaan taageersanahay in xeerka dib loogu noqdo Xeer Lr. 23 oo lala saxo Xeer Lr. 20. Iyaga oo wada socda Guddida Arimaha Guduhu wax ha ka bedelaan oo ha inoo keenaan waan taageersanahay. Arrinka mooshinka waxaan leeyahay mooshinkaasi maadaama uu qodob kaliya ahaa wuxuu noqonayaa mooshin warab. Waxaan uga jeedaa markaynu golaha soo galnay inagaa xeerka wax ka bedelnay. Markii hore kala badh iyo hal ayaa lagu bedelayey Maayirka iyo Ku xigeenka dhibaatadii ka dhacday iyo murunkii ka yimid ayuu dib inoogu soo noqday. Waxaynu garanay oo macquul noqotay oo aynu garanay in laga bedelo taasi, si uu degenaasho xaga maamulka ahi ugu yimaado dawladaha hoose, in markaa laga dhigo 2/3 waxay noqotay gar, caqli iyo macquul. Maanta wixii aynu ka cabaadnay oo murankii dib ha loogu celiyo waxaan u malaynayaa caqligeena way yara nacasaynaysaa.

Maanta waa run Maayirka iyo Golaha Deegaankuba dhaliilo badan ayey leeyihiin hadana wax way wad wadaan, waxaad ka soo qaadaa Matalan Hargeisa ayaa laga dhigay 13, markaa maayirkii ma waxbuu qaban mise 13 ayuu isla ilaalin. Teeda kale nooca tayada Golaha deegaanka ayey qayb ka qaadanaysaa, laakiin maanta waxa inoo muuqata qofka maayirka noqonayaa inuu iska eegayuun 13 ridaya, siduu u kala furi lahaa inuu iyagii ku mashquulo ka maanta laga bedelaa dhufays ayuu soo gelyaa wuxuu noqonayaa inta uu maayirka cusub dhufays u soo galo uu halkaas ka bilaabo. Markaa mudane guddoomiye iyo mudanayaalba xalku wuxuu ku jiraa in 2/3 loo daayo ama ha dhacaan oo wakhtigu ha ka dhamaado ama mid kale ha yimaado. Waxa muhiim ah in maayirku haysto isku halayn uu hawsha ku qabto oo kalsooni timaato anigu qaar badan in la bedelo ilaalin maayee nidaamka xumaanayaa ilaalinayaa. Waxaan leeyahay mooshinka sidii hore ee 2/3 ha loo daayo ilaa abid inta la soo jeedinayo.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- In la kala saaro Mooshinka iyo Xeerka oo Mooshinka gaar cod loogu qaado, Xeerkana gaar loo gudagalo, WSC**.**

**Md. Axmed Cabdi Kaahin:-** horta Gudoomiye anigu Golaha ma joogin markii aad ansixiseen oo markii 2005 aanu ka tagnay ka dib baad ansixiseen, kii horena wuu khaldan yahay, kana wuu khaldan yahay intii la iswada haystay bayna ahayd in wax la saxo, iminka wakhtigiina waa yar yahay oo sideed bilood baa hadhay oo maayarka cusub gurigiisa hagaajintiisa iyo gogoshiiba laga bixi maayo oo hada kan hore ayaaba sii yara qaboobaye ha loo daayo intaas hadhay intii mid cusub odhan lahaa wax yar baaba ka hadhay adna ka sii ururso, markii hore fikirkaas waan qabay laakiin markaan ka yar fikiray dib baan uga noqday mar hadii kuwa cusub ee aynu keenaa ay sii xaabsanayaan, markaa faa'iido maynaan keenin.

**Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa: -**

- Inaynu lixda bilood sidooda u dayno Xeerkaas ayaan qabaa oo Qodobkaas sidiisa ha lagu daayo, Xeerka wax ka badal ha lagu sameeyo oo Gudidda Arrimaha Gudaha ha loo dhiibo.

| **Cawad Cali Maxamed** | **Cabdirisaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ______________________________ | ______________________________ |